# Xeerka shaqaalaynta

MAINE DEPARTMENT OF LABOR
*Bureau of Labor Standards*

Shuruucda shaqaalaha ee qobolka Maine wuxuu difaac u fidiyaa dadka Maine ka shaqeeya. Waaxda Shaqada ee Maine waxay maaraysaa sharciyada, ee ay tahay in loo-shaqeeyayaasha oo dhan ay tahay inay raacaan. Wakiilada waaxda waxay baaraan goobaha shaqada si loo hubiyo u hogaansanaanta. Waxaa dhici karta in dalab maxkamadeed iyo ganaaxyo lagu soo rogo loo shaqeeyeyaasha aan u hoggaansamin.

Qoraalka boorkan wuxuu sharxayaa qaybo muhiim ah oo ka mid ah sharciyada. Nuqul ka mid ah sharciyada dhabta ah ama tarjumaadaha rasmiga ah sharciga ayaa waxaa laga heli karaa Waaxda Shaqada, Xafiiska Heerarka Shaqada, adigoo ka wacaya 207-623-7900. (Sidoo kale shuruucdu waxaa kaloo ay ku qoran yihiin bogga interneetka ee waaxda.)

Sharciga Maine (qodobka 26aad Maine oo Dib uu eegay Xeerarka La Sharxay § 42-B) wuxuu shaqo-bixiye kasta uu ugu baahan yahay inuu boostarkan ku dhejio goobta shaqadaa oo ah meel shaqaaluhu si fudud ku arki karaan.

Qoraalka boostarkan waxaa laga heli bogga interneetka iyada oo aan wax lacag ah aan lagugu soo dalacayn oo waa la soo min-guursan karaa: https://www.maine.gov/labor/posters/

**Waqtiga bixinta**
Shaqaalaha waa in mushahar 16 maalmood kasta si buuxa loo siiyaa. Shaqaalaha waa in lagu wargaliyaa hoos udhac kasta ee lagu sameeyo lacagta saacadda lagu shaqeeyo ama mushaarka ugu yaraan hal maalin kahor isbedelka.

**Bixinta mushaaraadka**
Shaqaalaha ka taga shaqada waa in mushahar buuxa la siiyaa maalinta xigta ee mushaharka la bixiyo ama laba toddobaad gudahood, hadba kii soo hor mara. Waxaa dhici karta in lacagtan ay sidoo kale ku jirto lacagta bixinta mushahar ururin iyo/ama lacagta fasax mushahar la kasbaday la bixiyo haddii nidaam sidaas ah ay shirkadda ay horey u la'hayd.

**Heshiis aan cadaalad ahayn**
Loo-shaqeeyayaashu shaqaalaha uga ma baahnaan karaan in shaqaaluhu uu bixiyo khasaaro shirkadda soo gaaray sida alaab jabtay, jeegag xun, ama biilal ayna bixin macaamiisha, iyo labis yunifoorm gaar ah iyo qalabyada ganacsiga qaarkood.

**Biriifyada nasashada**
Shaqaalaha badankood waa in lasiiyaa 30-daqiiqo oo nasasho ah oo ah nasasho lacag lagu siiyo ama nasasho aan lacag lagu siin ka dig marka ay ka soo wareegato 6 saacadood oo shaqo ah.

Hooyooyinka naas nuujinaya waa in la siiyaa waqti nasasho oo aan mushaar lahayn ama loo oggolaado inay isticmaalaan nasashadooda lacagta lagu siiyo ama waqtigooda cuntada si ay caano u muujiyaan. Loo-shaqeeyaha waa inuu dadaal macquul ah si uu shaqaalaha ugu fidiyo qol nadiif ah ama goob, oo aan ka ahayn musqusha, halkaas oo caanaha la isaga liso.

**Fasaxa qoyska iyo daawada**
Qofka shaqaalaha ah ee ka shaqeynayay 12-kii bilood ee la soo dhaafay goob shaqo oo ay la shaqeeyaan 15 ama in ka badan oo shaqaale ah wuxuu fasax ku qaadan karaa ilaa 10 toddobaad oo mushaar la siinayo ama aan la siinin muddo 2 sano gudahood ah:

- Dhalashada ama korsashada ubad ama ubad lammaane guriga la jooga;
- Jirro daran oo shaqaalaha ama xubin qoyska ka mid ah ku timaada, oo ay ku jiraan lammaanaha guriga ku wada nool;
- Ku tabaruca xubnaha;
- Geeri ama xaalad caafimaad daro oo halis ah oo ku timaada xaaska qofka shaqaalaha ah, lammaanaha guriga, waalidka ama ubadka haddii ay dhacdo inta xaaska, lamaanaha guriga, waalid ama ubad ay ku jiraan shaqo;
- Xanuun daran ama dhimasho ku timaada walaalkiis/walaashiis oo heshiis nolol wadaage ah iyo heshiis dhaqaale la ah shaqaalaha.

(Fasaxa qoyska iyo fasaxa daawaynta ee sharciga federaalka waa ka duwan yahay, wac 866-487-9243 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.)

**Fasax loogu talagalay dhibanayaasha rabshada, weerarka, weerarka galmada ama daba-galka ama gaadka**
Waa in loo ogolaadaa marka la soo codsado haddii shaqaale (ama ubad, waalid ama xaaska qofka shaqaalaha ah) ay yihiin dhibbane rabshad, gacan ka hadal, faraxumeyn galmo ama dabagelin ama fal kasta oo taageeraya amarka ilaalinta ee ku xusan qodobka 19-A Maine oo Dib uu eegay Xeerarka La Sharxay faahfaahin, c. 101 shaqaaluhuna uu u ubaahanyahay waqti uu:

- U diyaar garoobo kana qaybgalo dacwadaha maxkamadda; ama
- Helo daaweyn caafimaad; ama
- Helayo adeegyo daruuri u daaweynta dhibaatada.

**Maqnaansho daryeel qoys**
Haddii sharciga loo shaqeeyaha uu dhigayo inay bixinayaan wakhtiga shaqaalaha shaqada uu ka maqan yahay, shaqaalaha waa in loo ogolaadaa inuu isticmaalo ilaa 40 saacadood muddo 12 bilood gudahood ah si uu u daryeelo xubin qoyska ka mid ah oo xanuunsan.

**Fasax mushahar la kasbaday la bixiyo (dhaqan galayo 01.01.2021)**
Loo shaqeeye ay u shaqeeyaan in ka badan 10 shaqaale inta lagu jiro wakhtiga caadiga ah iyo tan caadiga ah in ka badan 120 maalmood sanad waa inuu shaqaale kasta u oggolaadaa inuu kasbado fasax mushahar lagu siinayo mushaharkaas oo lagu salaynayo mushaharka lagu shaqeeyo. Shaqaalaha wuxuu xaq u leeyahay inuu kasbado hal saac oo lacag lagu siinayo hal loo shaqeeyo 40 saacadood oo kasta oo la shaqeeyo, ilaa 40 saacadood oo ah sal sano oo shaqo ah. Iskudarka fasaxu wuxuu bilaabmayaa bilowga shaqada, laakiin loo shaqeeyaha loogama baahna inuu ogolaado isticmaalka fasaxa kahor intaan shaqaaluhu ushaqeynin loo shaqeeyahaas muddo 120 maalmood ah inta lagu jiro muddo hal sano ah.

**Baaqa canshuurta ee daqliga la kasbaday**
Waxaa dhici karta in shaqaalaha ay xaq u yeeshaan canshuurta dhaafka ee daqliga la kasbaday ee heer gobol iyo federaal. Shaqaaluhu waxay dalban karaan canshuur dhaafka marka la gaaro canshuur celinta shaqaalaha.

**Ogsoonow:** Loo-shaqeeyayaasha Maine sidoo kale waxaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan Xeerka Caadiga ah ee Shaqada Caddaaladda ee Dowladda Federaalka (Federal Fair Labor Standards Act). Wixii macluumaad dheeraad ah, kala xiriir Xafiiska Waaxda Mushaharka Shaqaalaha iyo Xafiiska Saacadda Mareykanka (U.S. Department of Labor Wage and Hour Office) lambarka 866-487-9243.


**Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:**
Maine Department of Labor
Bureau of Labor Standards
45 State House Station
Augusta, Maine 04333-0045
ku yaala: 45 Commerce Drive
Telefoon: 207-623-7900 | Isticmaalayaasha TTY wac Maine Relay 711.
Bogga Interneetka: www.maine.gov/labor/bls
Iimeel: bls.mdol@maine.gov


**Kartida shaqaalaha shaqada looga soo joojin karo - Sida uu qabo sharciga Maine, shaqaalaha shaqaada waxaa looga joojin karaa sabab kasta oo uusan si gaar ah sharcigu u mamnuucin. Xaaladaha badankood, adigu waxaad tahay shaqaale rabitaan shaqada ku jooga aysan ka ahayn haddii aad hoos timaado heshiiska gorgortanka wadajirka ah ama qandaraas kale oo xaddidaya shaqo joojin. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid kartida shaqaalaha shaqada ku jooga ama looga joojin karo, waxaad la xiriirtaa waaxdaada shaqaalaha ama Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha.**

Waaxda Shaqada ee Maine waxay fidisaa fursad loo wada siman yahay ee xagga shaqada iyo barnaamijyada. Adeegyo iyo kaalmo ayaa loo diyaariyay dadka naafada ah marka ay soo codsadaan.

rev. 10/20